SØRLANDET SYKEHUS

# MACLUUMAAD KU SAABSAN MASHRUUC CILMI BAARIS AH OO LOOGU TALAGALAY ADIGA OO KU UMULI DOONTO KRISTIANSAND ISBITAALKA

## UJEEDADA MASHRUUCA

Inta lagu jiro dhalmada, isbitaalada Norway waxay isticmaalaan muunad si ay u qiimeeyaan wax iska soo tirka foosha oo loo yaqaan WHO partogram. Sannadkii 2020, Hay 'adda Caafimaadka Adduunka (WHO) waxay daabacday muunad cusub oo hadda lagu talinayo in lagu qiimeeyo wax iska soo tarka foosha, oo loo yaqaan "Hagaha Daryeelka Foosha". "Hagaha Daryeelka Foosha" waxay ku saleysan tahay cilmi baaris la cusbooneysiiyay oo ku saabsan wax isasoo tarista foosha, oo ay ku jiraan in daloolka makaanka afkiisa ah ay ku kala duwan yihiin haweenka. "Hagaha Daryeelka Foosha" ayaa sidoo kale diiradda saaraya xuquuqda haweenka inay dadka kale la gaarto go'aanka, oo ay ku jiraan xilliga foosha. Gudaha Noorway, weli ma aanan ka dhaqan gelinin "Hagaha Daryeelka Foosha" wixii ka horeeyay 2024. Ujeedada daraasaddan ayaa ah in la baaro saameynta ay u leedahay muunadan mashruuc cilmi baaris ah ka hor inta aan ugu dambeyntii laga hirgalinin dalka oo dhan, si loo gaarsiiyo daryeel cilmi-baaris ku saleysan oo diyaarsan dhammaan haweenka ku nool Norway. Kristiansand isbitaalka waa mid ka mid ah toban isbitaal oo ku lug leh mashruucan cilmi baariseed, halkaas oo “Hagaha Daryeelka Foosha” laga hirgelin doono inta lagu jiro muddada 2025-2026. Waqtiga uu qaadan doono kala-guurka iyadoo laga soo bilaabiyo WHO partogram ilaa iyo "Hagaha Daryeelka Foosha" waxaa lagu go 'aamin doonaa nidaam elektaroonig ah iyada oo aysan cilmi-baarayaashu awoodin inay saameyn ku yeeshaan waqtiga uu qaadanayo kala-guurka. Haweeney kasta oo ku dhasha isbitaalka waxaa lagula socon doona muunada cusub marka isbitaaladu bilaabaan hirgelinteeda. Intaas ka hor, dhalmada oo dhan waxaa loo raaci doonaa qaab-dhismeedka hore.

## WAA MAXAY MACNAHA MASHRUUCU KUU LEEYAHAY?

Markaad dhasho waa lala socon doonaa iyadoo lagu salaynayo baahidaada iyo baahida ilmahaaga, iyadoo la isticmaalayo muunada qiimaynta horumarka ee isbitaalka, haddii aad ku jirto mashruuca iyo haddii kale. Daraasaddu wax qayba kama ahan wixii dhib ah ee soo gaaro adiga ama ilmahaaga.

Macluumaadka aan rabno inaan u ururino mashruuca cilmi-baarista waa isla macluumaadka sida joogtada ah loogu qoro diiwaankaaga markaad dhasho. Macluumaadka waxaa ka mid ah, tusaale ahaan, da'da, muddada uu joogo uurka, muddada foosha, faragelinta iyo tallaabooyinka la qaaday intii lagu jiray dhalmada, iyo macluumaadka lagu qoray diiwaankaaga caafimaadka ee ilmaha marka dhashay.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad ku darto macluumaadkaaga ku saabsan foosha mashruucan cilmi-baariseed, uma baahnid inaad saxiixdo ama noo soo dirto foomkan.

Waxaa lagu weydiin doonaa inaad buuxiso ssu'aalo-waydiimo ku saabsan waayo-aragnimadaada foosha. Fariin-qoraaleed oo la socdo linkiga ku gaynayo macluumaad iyo su'aalo-waydiimo ayaa laguu soo diri doonaa qiyaastii afar toddobaad ka dib markaad dhasho. Su'aalo-waydiimahan waxay kugu qaadan doonaan qiyaastii 20 daqiiqo si aad u dhammaystirto. Waa ikhtiyaari gebi ahaanba haddii aad rabto inaad ka jawaabto su'aalo-waydiinta. Haddii aad ka jawaabto su'aalo-waydiimaha, waxaad aqbashay inaan kugu dari karno macluumaadka lagu helay su'aalo-waydiimaha mashruuca cilmi-baarista.

Waxaan sidoo kale jeclaan lahayn inaan u codsano haweenka si aan kala sooc lahayn, markay dhalaan ka dib, si ay uga qaybqaataan dood kooxeedyo la xiriira waayo-aragnimada foosha. Waxaan kula xiriiri doonnaa qaar ka mid ah kaqeybgalayaasha fariimo-qoraaleed wareysiguna waxaa si kooxo ah loogu qaban doonaa isbitaalka wuxuuna qaadan doonaa qiyaastii hal saac. Ka qaybqaadashadu gebi ahaanba waa ikhtiyaari, laakiin haddii aad ogolaato inaad kaqeybqaadato dood kooxeedyada, waxaa lagu weydiin doonaa inaad saxiixdo foom ogolaansho oo gooni ah si aan ugu darno macluumaadka aad ku bixiso wareysiga mashruuca cilmi-baarista. Natiijooyinka waxaa loo daabici doonaa qaab qarsoodi laga dhigayo aqoonsigaaga, si aan qofna kuu aqoonsan karin.

## MAXAA KU DHACA MACLUUMAADKA ADIGA KUGU SAABSAN?

Dhammaan macluumaadka adiga iyo ilmahaaga ku saabsan waa la qarin doonaa lagumana dari doono tafaasiisha gaarka ah ka hor inta aanaan la falanqaynin. Tani waxay ka dhigan tahay in xogta lagu shaqa galin doono magacyo la'aan, lambarada aqoonsiga, ama macluumaad kasta oo kale oo lagu aqoonsan karo shakhsiyaadka. Koodhka kugu xiraya macluumaadkaaga waxaa lagu keydiyaa nidaamyada xogta asturan ee Isbitaalka Østfold iyadoo la raacayo tilmaamaha/sharciga keydinta xogta cilmi-baarista. Kaliya cilmi-baarayaasha iyo isku-duwaha mashruuca ayaa isticmaali kara koodhka, mana dhici doonto in la aqoonsado shakhsiyaadka marka xogta la daabaco. Ka dib markii mashruuca cilmi-baarista la dhammeeyo, xogta cilmi-baarista waxaa ujeeddooyinka xakamayn loo hayn doonaa shan sano. Waxaad xaq u leedahay inaad fiiriso macluumaadka diiwaanka ku jiraee ku saabsan adiga, waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad saxdo wixii ka qaldan macluumaadka la diwaangeliyay. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad inaad marin u hesho tallaabooyinka amni sugida ee lagu fuliyo marka aga shaqaynayo xogta. Waxaad soo gudbin kartaa cabasho ku saabsan sida xogtaada loogu maareeyo Maamulka Ilaalinta Xogta Norway iyo sarkaalka ilaalinta xogta ee hay'ada.

## OGOLAANSHAHA

Guddiga Gobolka ee Anshaxa Cilmi-baarista Daawooyinka iyo Caafimaadka ayaa dib u eegay oo ansixiyay mashruuca (#603063). Daraasaddan waxaa ansixiyay maamulka Rugta Haweenka, Kristiansand isbitaalka, waxaana talooyin siiyay Sarkaalka Ilaalinta Xogta ee Kristiansand isbitaalka.
Isbitaalka Østfold iyo maareeyayaasha mashruuca Rebecka Dalbye iyo Stine Bernitz ayaa mas'uul ka ah mashruuca. Si ay uga qayb qaataan mashruuca, bukaanada waxaa loo tixgalinayaa in ay ogolaadaan ilaa ay si gaar ah uga baxaan mooyaane, sida uu qabo sharciga cilmi baarista caafimaadka §13. Macluumaadka ku qoran warqaddan ayaa buuxinaya shuruudaha wada-tashiga, daahfurnaanta iyo saadaalinta. Sababta sharciga ah ee loo isticmaalo xogta shakhsi ahaaneed iyo caafimaadka ee cilmi-baadhistan waxay ku salaysan tahay Qodobka GDPR 6 lambarka1 xarafka e (uga shaqaynta danta guud) iyo Qodobka 9 lambarka 2 xarafka j (ujjeedada cilmi baadhista sayniska). Waxaa jira sababo dheeri ah oo ku jira qaybaha 8 iyo 9 ee Sharciga Xogta Shakhsiyeed.

## MACLUUMAADKA QOFKA LAGALA XIRIIRO

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan mashruuca, fadlan la xiriir maareeyayaasha mashruuca. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan asturnaanta mashruuca, fadlan kala xiriir sarkaalka ilaalinta xogta Isbitaalka Østfold: personvernombudet@so-hf.no, ama sarkaalka ilaalinta xogta ee Kristiansand isbitaalka: personvernombuden@sshf.no .

Si daacadnimo Leh, Maareeyayaasha mashruuca


| | |
|---|---|
| Stine Bernitz, umuliso, PhD, stiber@so-hf.no | Rebecka Dalbye, umuliso, PhD, rebdal@so-hf.no |
| Professor, Kuliyadda Sayniska Caafimaadka, OsloMet | Ku-xigeenka Professor, Kuliyadda Sayniska Caafimaadka, OsloMet |
| Cilmi-baare, Rugta Haweenka, Isbitaalka Østfold | Cilmi-baare, Rugta Haweenka, Isbitaalka Østfold |


## XAQA AAD U LEEDAHAY INAAD KA BAXDO

Waxaad xaq u leedahay inaad ka baxdo in macluumaadka dhalmada lagu isticmaalo daraasadda. Ma jiri doonto cawaaqib xun oo kaa soo gaari doonto adiga ama daaweyntaada haddii aad doorato inaad ka baxdo in xogtaada lagu isticmaalo mashruuca cilmi-baarista.

**Haddii aad rabto in macluumaadkaaga ku saabsan foosha loo isticmaalo sida la soo sharaxay, HA saxiixin xaashidan.**

## KALIYA DADKA AAN RABIN IN XOGTOODA LAGU DARO MASHRUUCA CILMI-BAARISTA

Haddii aad rabto inaad ka baxdo in xogtaada ku saabsan foosha loo adeegsado cilmi-baarista, fadlan saxiix warqaddan oo u dhiib umulisadaada ama dhakhtarkaaga ku sugan qolka aad kaga jirto isbitaalka kaas oo diiwaangeliya ka bixitaankaaga.

Ma **doonayo** in xogtayda lagu daro mashruuca cilmi-baarista ☐

Goobta iyo taariikhda ________________________ Magaca oo dhamaystiran oo ku qoran far waaweyn_________________________________

Saxiixa___________________________________________________________

Wixii macluumaad dheeraad ah: https://uni.oslomet.no/norwelcg/

Wixii macluumaadka mashruuca ah ee ku saabsan luqadaha soo socda: English, Español, Français, Polski, اردو (Af Urdu), عربي (Af Carabi), Af Soomaali, українська (Afka Yukreynta), tag bogga shabakada: https://uni.oslomet.no/norwelcg/